

Saacadaha shaqada ee Träffpunkten:

Isniin 9.00 – 15.30

Talaado 9.00 – 15.30

Arbaco 9.00 – 13.00

Khamiis 9.00 – 15.30

Jimce 9.00 – 15.30

Cinwaanka:

Träffpunkt Torpa

Kastanjevägen 35

462 52 Vänersborg

Warbixin dheeraad ah kala xiriir:

Träffpunkt Torpa Tel: 0521-72 20 38

SOO DHAWAADA

**Ku soo dhawaada
Träffpunkt Torpa**



Kastanjevägen 35



Träffpunkt Torpa waa goobta kulanka dhaqanada kala duwan iyo guri lagu qanacsanaan karo ee dadka waaweyn ama qaraabada dadka waaweyn. Halkan ayaad u imaan kartaa inaad la socoto oo la sheekeesato dad kale oo weliba aad fursad u haysato inaad afkaaga hooyo ku hadasho.

Shaqaale ayaa mar walba meesha ku suggan oo ay kaa caawinayaan waxyaabaha badanaaba la is weydiiyo oo weliba ay talo, taakulayn iyo warbixin kaa siin karaan hawlaha maamulka degmada iyo sida loola xiriiri karo.

Waxay ku wada hadlaan afaf badan sida afka romaaniga, boosniga, seerbiga kurawaatiga, carabiga, soomaaliga iyo iswiidhishka.



Nolol maalmeed mecno leh ayaa ka jirta Träffpunkt Torpa

Halkan ayaad imaan kartaa oo qaxweysan kartaa, akhrisan kartaa wargeysyada, ciyaari kartaa ciyaaro wadajir, socsocon kartaa, ka qayb gali kartaa ciyaaraha jirdhiska, qaban kartaa ciido kala duwan iwm.

Waxaa ku yaalla barxad aan ku abuuri karno beero yaryar, kuna socsocan karno. Waxaan bixinaa cunto todobaadkiiba mar oo xitaa adiga aad ka mid noqon karto oo aad soo karin karto cunto.



Waa immisa kharajku?

Waa lacag la'aan booqashada rugta Träffpunkten umana baahna in la sii codsado booqashada. Qaxweysi iyo cunto ayaa lagu heli karaa qiime jaban.

Soo dhawaada!